



Iskuul loo siman yahay iyo iskuul u qaadidda

Warbixin ku saabsan iskuul u qaadidda ardayda ee loogu talagalay ardayda deggan xaafadaha Frälsegården ama Kronogården ee dhigta dugsii hoose dhexe.

Warbixintaan waxaa loogu talagalay adiga waalidka u ah arday dhigta dugsiga hoose dhexe oo deggan Kronogården ama Frälsegården ee ku yaal Trollhättan. Halkaan waxaad ka ogaanaysaa waxa ay tahay iskuul u qaadidda iyo ardayda loo oggolyahay in iskuulka loo qaado. Waxaad sidoo kale halkaan ka helayaa su'aalaha caadiyan laga qabo iskuul u qaadidda.

Degmada Trollhättan waxay go'aan ku gaartay in la xiro fasallada 4-6aad iyo fasallada 7-9aad ee iskuullada Kronan iyo iskuulka Frälsegårsskolan laga bilaabo xilliga kulaylaha 2021. Ardaydu waxay bilaabayaana iskuullada cusub xilliga deyrta waxayna xaq u yeelanayaan in iskuullada loo qaado.



Waa maxay iskuul u qaadidda?

Waxaa qofka loo oggolyahay in iskuulka loo qaado haddii gurigiisa iyo iskuulka laga qoray ay kala fog yihiin. Jadwalka iskuul u qaadidda waxaa la waafajiyay bilowga iyo dhammaadka wakhtiga iskuulka. Ardayda deggan Kronogården ama Frälsegården waxay subaxii baska iskuulka kasoo raacayaan maxadada u dhow iskuulka Kronans skola. Basku ardayda wuxuu gaynayaa iskuulkooda cusub. Maalinta iskuulka markii ay dhammaato waxaa [ardayda soo qaadaya baska iskuulka](#) oo dib ugu soo celin doonaa maxadada ku taal Kronans skola. Waxaa sidoo kale hadda jira arday raaca tagsiga iskuulka ama basas gaar ah. Iskuul usoo qaadidda ardayda waa bilaash.

Yaa loo qaadi karaa iskuulka?

Sharciga iskuulka iyo shuruucda degmada Trollhättan baa go'aaminaya ardayda loo oggolyahay in iskuulka loo qaado. In qofka loo oggolaado iskuulka in loo qaado waxay ku xiran tahay meeshuu qofku deggan yahay iyo iskuulka qofku dhigto.

- **Ardayda deggan Kronogården ama Frälsegården ee dhigta fasallada 3-6 ee Frälsegårsskolan ama dhigta fasallada 3-8 ee Kronan:** Haddii ardayda lagu qoro mid ka mid ah iskuullada Lyrfågelskolan, Stavreskolan, Strömslundsskolan, Paradisskolan ama iskuulka Skogshöjdens skola waxay ardaydu xaq u leeyihiin in iskuulka loo soo qaado. Uma baahnid inaad buuxisid foom codsi.
- **Ardayda deggan Kronogården ama Frälsegården oo haddaba dhigta Strömslundsskolan, Paradisskolan ama Skogshöjdens skola:** Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in iskuulka loo qaado. Uma baahnid inaad foom codsi soo buuxisid.
- **Ardayda deggan Kronogården ama Frälsegården oo haddaba dhigta Lyrfågelskolan ama Stavreskolan:** Ardaydu waxay xaq u yeelan karaan in iskuulka loo qaado, laakiin waa khasab inaad buuxisid foom codsi aw ku siin doono macalinka ardayga qaabilsan.

Ardayda keliya baa raaci kara baska iskuulka

Baska iskuulka waxaa loogu talagalay ardayda dhigata iskuulka oo xaq u leh in iskuulka loo qaado. Darawalka baska iskuulka wuxuu haystaa liis ay ku qoran yihiin magacyada ardayda raaci kara baska. Saaxiibada ama walaalaha aan xaq u lahayn in iskuulka loo qaado ma raaci karaan baska iskuulka.

Safar amni ah oo iskuulka loogu qaadayo loogana soo celinayo

Waa muhiim in ardayda ay amni ku dareemaan baska. Waxaa sidaas darteed jira shaqaale goobta ku sugnaan doona laga soo bilaabo maalinta koowaad ee iskuulka ee 18 agosto (agoos) iyo asbuucyada u horreeya. Shaqaaluhu waxay ardayda la raacayaan baska oo ay ka shaqaynayaan in dhammaan ardaydu amni dareemaan. Shaqaaluhu waxay ardayda ku caawinayaan inay kala bartaan iskuulka markii basku keeno.

Wakhtiga ugu imow baska

Waxaa aad u muhiim ah inaad maxadada wakhtiga ku timaadid. Haddii aw kaa tago baska iskuulka waa inaad iskuulka qaab kale ku tagtid. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad bas sax ah raacdid. Waxaa jira basas badan oo ka baxa maxadada Kronans subax kasta.


Jadwalka baska waa mid ku haboon si dhammaan ardayda wakhtiga ugu tagaan iskuulka subaxdii inta uusan iskuulku bilaaban ka hor. Isla sidaas oo kale basku wuxuu baxaa markii maalintii iskuulku dhammaado, si ardaydu guriga wakhtiga ugu yimaadaan. Sidaas darteed basku ma sugi doono qofkii soo daaha.

Waa muhiim in bas sax ah la qaato

Basasku waxay aadaan iskuullo kala duwan, waxaana dhici karta inaad iskuul khalad ah aadid haddii aad qaadatid bas aan ahayn kii aad raaci lahayd. Haddii aad ogaatid inaad bas khalad ah raacday waxaad la hadlaysaa darawalka baska oo u sheegaysaa waxa dhacay. Darawalka baa kaa caawinaya inaad la xiriirtid macalin ama qof wayn oo iskuulka jooga si aad caawinaad u heshid.

Baska iskuulku wuxuu istaagayaa Kronan bannaankiisa

Weli go'aan lagama gaarin wakhtiga baska iskuulku subaxdii iyo galabtii ardayda soo qaadayo oo geynayo. Jadwalka wakhtiga basku baxayo waxaa la diyaarinayaa juulaay (luulyo). Waxaa la go'aamiyay in maxadada laga dhigo iskuulka kronan bannaankiisa. Halkaas bay dhammaan ardaydu baska ka raaci doonaan oo uga degi doonaan baska iskuulka kaddib.



Maxadada

Khariidadaan waxaad ka arki kartaa iskuulka Kronan iyo maxadada baska iskuulka oo calaamad la saaray.

Maxadada = 



Warbixin intaa dheer oo ku saabsan iskuul u qaadidda

Waxaad heli doontaa warbixin intaa dheer oo ku saabsan iskuul u qaadidda bilowga bisha juulay (luulyo). Markaas baa qorshaha iskuul u qaadidda la dhamaystiri doonaa oo aad heli doontaa jadwalka xilliga basku baxayo oo guriga lagugu soo diri doonaa boostadana laguu soo dhigi doono. Jadwalkaas waxaa ku qoran baska ilmahaagu raaci doono, meesha maxadadu ku taal, iyo marka basku baxayo subaxdii iyo galabtii.

Waxaad wixii intaa dheer oo ku saabsan iskuul u qaadidda ka akhriin kartaa Bogga degmada Trollhättan:

www.trollhattan.se/skolskjuts

Bogga waxaad kasoo degsan kartaa foomka codsiga iskuul u qaadidda haddii ardaygu uu deggan yahay labo cinwaan ama idinku aad u doorteen iskuul aan ahayn kan lagu qoray.

Waxaad sidoo kale soo degsan kartaa shuruucda iskuul u qaadidda ka jirta Trollhättan.

Ardayda deggan Kronogården ama Frälsegården oo haddaba dhigta mid ka mid ah iskuullada Stavreskolan, Lyrfågelskolan, Paradisskolan, Strömslundsskolan ama Skogshöjdens skola, waxay heli doonaan warbixin ku saabsan iskuul u qaadidda iyo foom lagu codsanayo iskuul u qaadidda laga bilaabo 12 abriil.

